War-saxaafadeed

Shaqaalaha caafimaadku waa kuwo muhiim u ah tallaalidda, Soomaaliya ayaa amaantaa ka jeedisey munaasabadda Maalinta Cudurka Dabeysha ee Adduunka

Wareegga labaad ee ololaha la-dagaallanka cudurka dabeysha ayaa dalku u diyaar yahay in uu ku daahrogo gobollada koonfurta iyo bartamaha dalka

MUQDISHO, 24 Oktoobar 2020 – Munaasabadda Maalinta Cudurka Dabeysha ee Adduunka oo ku beegan maanta , Wasaaradda Caafimaadka iyo Daryeelka Bulahada JFS u dabaaldegeysa dadaalka joogtada ah ee ay wadaan shaqaalaha la-dagaallanka cudurka dabeysha ee ay ku gaarayaan ayna ku tallalaayaan ilmo kasta oo ku nool dalka si loo dabargooyo dhammaan noocyada kala duwan ee cudurka dabeysha, iyo doorka ay ka qaataan xoojinta nidaamyada caafimaadka iyo wax-ka-qabashada xaaladaha degdegga ah ee caafimaadka la xiriira.

Tan iyo bilowgii barnaamijka dabargoynta cudurka dabeysha oo ahayd sanadkii 1997, ayaa boqollaal shaqaalaha caafimaad ee cudurka dabeysha ay ka shaqeeyeen is-hortaaggida noocyo kala duwan oo ka mid ah fayruska *cudurka dabaysh* ee sababa cudurka oo dillaacay, sidoo kale waxaa ay ballaariyeen taageerada ay bixiyaan si ay bulshada uga ilaaliyaan daacuunka, jadeecada iyo cudurro kale.

Kooxaha la-dagaallanka cudurka dabeysha ayaa abuurey silsilado sahay oo tallaalada lagu gaarsiinayo gees kasta oo la tegi karo oo dalka ka mid ah iyo in saxarooyinka la baarayo lagu gaarsiiyo sheybaarrada waqtigii ku habboonaa si baaritaan loogu sameeyo. Waxaa ay sidoo kale abuureen nidaamyo xasaasi ah oo la casriyeeyey oo lagula soconayo xaaladaha oo digniinno ka bixinaya cudurrada ka dhex jira bulshooyinka, oo macluumaadka soo kordha islamarkiiba la wadaagi kara daneeyeyaasha oo abuuri karana shabakado abaabula bulshada si ay farriimo caafimaad u gaarsiiyaan degmo kasta oo dalka ka mid ah. Inta ay abuurayaan nidaamyo muhiim ah oo loo adeegsado gaarsiinta daryeelka caafimaadka iyo inta ay xoojinayaan xiriirrada ka dhexeeya bulshooyinka iyo kuwa bixiya adeegyada caafimaadka, ayaa kooxuhu waxaa ay aasaasyo xooggan u sameeyeen adeegyada caafimaadka dadweynaha.

Tan iyo bilowgii sanadka, kooxaha caafimaadka ee la-dagaallanka cudurka dabeysha waxaa ay ku biireen la-dagaallanka cudurka KOROONA-19 ee Soomaaliya, iyaga oo gacan ka geysanaya raadinta, raadgurka iyo ka-warqabka dadka looga shakiyo iyo kuwa la xaqiijiyeyba in uu ku dhacay cudurka. Inkasta oo shaqaalaha caafimaadka ay ku khasbanadeen in ay hakiyaan adeegyadii caafimaad ee joogtada ahaa si ay xooggooda isugu geeyaan wax-ka-qabashada cudurka dunida oo dhan ku baahay ee KOROONA-19, ayaa bishii la soo dhaafey, Soomaaliya waxaa ay qaaddey tallaabooyin geesinimo leh oo ay dib ugu bilaabeyso hawlihii caadiga ahaa ee caafimaadka, iyada oo qabaneysa ololayaal tallaal oo lagu joojinayo faafidda nooc naadir ah oo ka mid ah fayruska *Cudurka Dabaysha*.

Si loo joojiyo cudurka dabeysha ee dillaacay ee hadda socda, kaas oo durba ku dhacay 23 caruur ah, ayaa Wasaaradda Caafimaadka iyo Daryeelka Bulshada ee Federaalka ee Soomaaliya, Ururka Caafimaadka Adduunka (WHO) iyo Hay’adda Qaramada Midoobey ee Carruurta (UNICEF) ayaa xaqiijinaya in kooxo caafiamaad oo si wanaagsan u tababaran ay fulin doonaan wareeggii ugu dambeeyey ee ololihii la-dagaallanka cudurka dabeysha ee labada wareeg ka koobnaa oo guri walba lagu tegayey oo laga fulinayo gobollada koonfurta iyo bartamaha dalka, laga bilaabo 25 illaa 28 Oktoobar 2020.

“Wareeggii koowaad ee ololaha tallaalka ayaa muujiyey in shaqaalaha caafimaadka ee Soomaalida ah lagu halleyn karo in ay si amaan ah u bixiyaan adeegyada tallaalka ee muhiimka ah inta uu socdo cudurka KOROONA-19 ee dunida oo dhan ku baahay. Kuwa carruurta tallaalaya iyo kooxo abaabulaya bulshada, oo adeegsanaya af-xir, gacmo-nadiifiye, gacmo-dhaqasho iyo tallaabooyin kala-fogaansho ayaa si ammaan ah ula kulmey qoysaska, uga jawaabay su’aalihii waalidiinta oo tallaaleyna carruurta. Wareegga koowaad ayaa ahaa mid si weyn loogu guuleystey, waxaana aan rajo wanaagsan ka leenahay wareegga labaad” ayaa ay tiri Marwo Dr Fawziya Abikar Nur.

Si waafaqsan hal-ku-dhegga Maalinta La-dagaallanka Cudurka Dabeysha ee sanadkan, ‘Guul laga soo hooyo cudurka dabeysha waa guul caafimaad oo caalami ah,’ ayaa uu yiri Dr Mamunur Malik, Wakiilka

WHO ee Soomaaliya ayaa Wasiirka Caafimaadka ayaa isna sidaas oo kale dhiniciisa kaga aamaney shaqaalaha la-dagaallanka cudurka dabeysha.

“Iyada oo ay mahaddeeda leeyihiin guulihii aan ilaa hadda xaqiijiney, ayaan waxaan aaminsannahay in aan hadda ku jirno lugtii ugu dambeysey ee safarka lagu dabargoynayo cudurka dabeysha.” ayaa uu yiri Dr Malik.

“Haseyeeshee waa in uu qof walba taxaddaraa, inkasta oo aan fayruska *Duurjoogta ah ee dabaysha* aan hadda lagu arkin Afrika, haddana noocyo kale oo fayruska *dabaysha* ah ayaa weli halis ku ah carruurta Soomaaliyeed. Haddii daryeelayaasha carruurta Soomaaliyeed ay ku soo biiraan dagaalka ka dhanka ah cudurka dabeysha ayna hubiyaan in carruurtooda ay qaataan tallaallada cudurka dabeysha markasta oo loo soo bandhigo in la tallaalo, waxaan awoodi doonnaa in aan cudurka dabeysha ka saarno Soomaaliya. Tani waxaa ay gacan innaga siineysaa in aan sii xoojinno guulihii aan ilaa hadda gaarney, in aan uga takhalusno cudurrada kale ee faafa ee dalka ka jira,” ayaa uu yiri.

Qaar ka mid ah culeysyada Soomaaliya haysta ayaa ah in ay adag tahay in la gaaro carruurta u baylahsan cudurka nabadgelyo-xumo iyo culeysyo kale oo adeegga (*Saadka*) la xiriira oo jira daraaddood, iyo in ay adag tahay in daryeelayaasha carruurta lagu qanciyo in tallaallada cudurka dabeyshu ay ammaan yihiin oo aaney wax u dhimmeynin carruurta dhowaan dhashey.

“Ku-haminta in aan gaarno ilmo kasta iyo in aan tallaalo siinno carruurta ugu baylahsan ayaa qayb ka ah ballanqaadkeennii soo-jireenka ahaa, ee loo dhammaa ee aan ballanqaadney inaaan ku dadaaleyno badbaadinta carruurta ku dhaqan Soomaaliya. Waxaa naga go’an in aan dowladda iyo la-hawlgalayaasha kala shaqeyno dabargoynta cudurrada looga hortegi karo tallaalka, xoojinta tallaallada joogtada ah, iyo dhisidda nidaamyo daryeelka caafimaadka aasaasiga ah oo xooggan, si markaa uu dalku uu dhammaan carruurtiisa u siiyo fursad wanaagsan oo ay ku badbaadi karaan ayna ku kobci karaan,” ayaa uu yiri Jesper Moller, oo ah ku-simaha Wakiilka UNICEF Soomaaliya.

Ololaha soo socda oo tiro ahaan loo soo bandhigayo:

- 1.65 milyan oo carruur ah ayaa ay tahay in la gaarsiiyo tallaalka cudurka dabeysha ee afka laga qaato
- 8 951 qof oo carruurta tallaala oo ka hawlgala degaannada magaalooyinka iyo miyigaba
- 1 125 kormeerayaasha kooxaha tallaalka ah iyo 364 korjoogayaal ah
- 3 390 wacyigeliyeyaasha bulshada ah oo baahinaya macluumaad
- 66 baabuur ay cod-baahiyeyaal ku rakiban yihiin oo dhex wareegaya bulshooyinka si ay u wargeliyaan qoysaska
- 62 degmo oo ku yaalla gobollada koonfurta iyo bartamaha Soomaaliya ayaa laga fulin doonaa

Dhammaan waalidiinta iyo daryeelayaasha carruurta waxaa lagula talinayaa in ay aqbalaan tallaallada mar kasta oo loo soo bandhigo, si carruurta sida ugu wanaagsan looga ilaaliyo cudurka dabeysha.

..

Maclumaad dheeri ah, fadlan kala soo xiriir

Khadar Hussein Mohamud
Head of Coordination & Communication
Ministry of Health & Human Services- Federal Republic of Somalia
Communication@moh.gov.so; Tel: +252 61 5602637

Eva Hinds
UNICEF Somalia Communication Manager
Email: ehinds@unicef.org; Tel: +252 613 642635

Fouzia Bhatti
WHO Somalia Communications Officer
Email: banof@who.int; Tel: +252 619 235 880

Qoraallo loogu talogaley tifaftirayaasha

- Nooca fayruska cudurka dabeysha ee Soomaaliya ku dhex wareegaya waa uu ka duwan yahay nooca loo yaqaanno *Duurjooga ee dabaysha*, kaas oo dhowaan lagu dhawaaqey in laga cirib-tirey Afrika, laakiin noocan ayaa bulshooyinka gaar ahaan meelaha aaney tiro carruur ah oo dad ku filan la tallaalin gelin kara halis waxaana uu sababi karaa in ay carruurta naafo *jilicsan* ah ay noqdaan inta noloshooda ka horsan.
- Waxaa jira noocyo badan oo fayruska cudurka dabeysha ah, waxaa jirta arrin muhiim ah oo ay ku kala duwan yihiin fayrusku cudurka dabeysha ee looyaqaanno Fayruska *Duurjooga ee dabaysha* ama fayruska cudurka dabeysha ee dabiiciga ku yimaada, kaas oo maanta ku harey dalalka Afgaanistaan iyo Bakistaan oo keliya, iyo nooca fayruska ee hadda ku wareegaaleysanaya Soomaaliya.
- Dhammaadkii Agoosto 2020, dunida waxaa ay u dabaaldegtey arrin taariikhi ah: in nooca fayruska loo yaqaanno Fayruska *Duurjooga ee dabaysha uu ka dhammaadey Afrika.* Guushan ayaa weli jirta. Ma jiro nooca fayruska ee Fayruska *Duurjooga ee dabaysha* oo hadda laga helo qaaradda Afrika. Laakiin noocyo kale oo fayruska cudurka dabeysha ah ayaa weli halis dad ku ah intiiba ay jiraan bulshooyin difaaca jirkoodu hooseeyo.
- Sida keliya ee lagu dabargoyn karo dhammaan noocyada fayruska cudurka dabeysha waa in dhammaan carruurta meel kasta oo ay joogaan laga tallaalo cudurka dabeysha. Meelaha lagu guuleystey in waqti hore laga joojiyo faafitaanka cudurka dabeysha oo heerarka is-difaaca jirka uu sarreeyo, ayaa la isticmaalaa tallaalka loo yaqannao *Tallaalka cudurka dabaysha ee aan noolay*. Meelaha ay sarreyso halista uu ku faafi karo fayruska dabeysha , iyo meelaha heerarka difaaca jirku aaney gaarsiisneyn halkii laga rabey, ayaa aaladda ugu wanaagsan ee shaqadan qaban karta ay tahay nooca tallaalka loo yaqaan *Tallaalka cudurka dabaysha* ee afka laga qaato, kaas oo hadda lagu isticmaalayo ololahan tallaalka.

Ololahan tallaalka cudurka dabeysha waxaa taageeraya the Ururka Hindisaha ciribtirka cudurka dabaysha ee caalamiga ah (GPEI), oo ah urur ay ka go'an tahay dabargoynta cudurka dabeysha. Ururkan GPEI oo la aasasey sanadkii 1988 waxaa hor-kacaya dowladaha dalka la joogo, Ururka Caafimaadka Adduunka (WHO), Rotary International, Xarunta Xakameynta iyo Ka-hortagga Cudurrada ee Mareykanka/ the US Centers for Disease Control and Prevention (CDC) iyo UNICEF, waxaana taageera la-hawlgalayaal muhiim ah oo ay ka mid yihiin mu'asasada the Bill & Melinda Gates Foundation iyo GAVI, the Vaccine Alliance.